

DOWLAD GOBOLEEDKA JUBALAND  
EE SOOMAALIYA  
WASAARADA KALLUUMAYSIGA  
& DHAQAALAH BULUUGA



JUBALAND STATE OF SOMALIA  
MINISTRY OF FISHERIES  
& BLUE ECONOMY

دولة إقليم جوبالاند الصومالية  
وزارة الثروة السمكية و داصتقلا  
قرزلا

## **Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluuga**

**Dib-u-egid Sharciga Kalluumaysiga Dowlad Goboleedka  
Jubbaland Ee Soomaaliyeed, xeerlr.23**

## Tusmo

|                                                           |    |
|-----------------------------------------------------------|----|
| QEYBTA1AAD.....                                           | 5  |
| QODDOBKA1aad.....                                         | 5  |
| XIGASHO.....                                              | 6  |
| QODDOBKA2aad.....                                         | 7  |
| ERAY-BIXIN.....                                           | 8  |
| QEYBTA2AAD.....                                           | 9  |
| QODOBKA3AAD.....                                          | 9  |
| DHERERKA BADDA SOOMAALIA.....                             | 9  |
| QODDOBKA4aad.....                                         | 9  |
| MAS’UULIYADDA WASAARADDA .....                            | 9  |
| QODDOBKA5aad.....                                         | 10 |
| MABAADII’DA MAAREYN TA IYO ILAALINTA KALLUUMAYSIGA .....  | 10 |
| QODDOBKA6aad.....                                         | 11 |
| HORUMARINTA KALLUUMAYSIGA.....                            | 11 |
| QODDOBKA7aad.....                                         | 11 |
| MAAMULKA KALLUUMAYSIGA.....                               | 11 |
| QODDOBKA8aad.....                                         | 12 |
| MAAREYN TA KALLUUMAYSIGA .....                            | 12 |
| QODDOBKA9aad.....                                         | 13 |
| MACLUUMAADKA KALLUUMAYSIGA IYO FAAHINTOODA.....           | 13 |
| QODDOBKA10aad.....                                        | 13 |
| CILMI-BAARIS.....                                         | 13 |
| QODDOBKA11aad.....                                        | 13 |
| XADDIDIDA KALLUUMAYSIGA .....                             | 13 |
| QEYBTA3AAD.....                                           | 14 |
| QODDOBKA12aad.....                                        | 14 |
| DIIWAAN-GELINTA MARAAKIIBTA KALLUUMAYSIGA.....            | 15 |
| QODDOBKA13aad.....                                        | 16 |
| HESHIIS KALLUUMAYSI .....                                 | 16 |
| QEYBTA4AAD.....                                           | 16 |
| QODDOBKA14aad.....                                        | 16 |
| BIXINTA SHATIIYADA GUUDAHAA.....                          | 16 |
| QODDOBKA15aad.....                                        | 16 |
| OGOLAANSHAHA KALLUUMEYSIGA IYO SOO GELIDDA BIYAHA         |    |
| DOWLAD GOBOLLEEDKA JUBBALAND EE                           |    |
| SOOMAALIYEED .....                                        | 16 |
| QODDOBKA16aad.....                                        | 17 |
| BIXINTA SHATIGA MARAAKIIBTA QALAAD EE KALLUUMEYSIGA ..... | 17 |
| QODDOBKA17aad.....                                        | 17 |
| BIXINTA SHATIGA KALLUUMEYSIGA EE MUWAADINKA.....          | 17 |
| QODDOBKA18aad.....                                        | 18 |
| UJUUROOYINKA.....                                         | 18 |

|                                                     |    |
|-----------------------------------------------------|----|
| QODDOBKA19aad.....                                  | 18 |
| MUDADA SHATIGA KALLUUMEYSIGA EE QALAAD .....        | 18 |
| QODDOBKA20aad.....                                  | 18 |
| MAMNUUCIDA ISDHAAFSIGA SHATIIYADA .....             | 18 |
| QODDOBKA21aad.....                                  | 18 |
| XAFIDAADA SHATIIYADA .....                          | 18 |
| QODDOBKA22aad.....                                  | 18 |
| ISTICMAALKA SHATIGA.....                            | 18 |
| QODOBKA23AAD .....                                  | 19 |
| AWOODDA BIXINTA SHATIIYADA .....                    | 19 |
| QODDOBKA24aad.....                                  | 19 |
| WAAJIBAADKA KALLUUMAYSATADA .....                   | 19 |
| QODDOBKA25aad.....                                  | 19 |
| NOOLAYAASHA BADDA EE LABADBAADINAYO .....           | 19 |
| (NOOLAYAASHA KHATARTA KU SUGAN) .....               | 20 |
| QODDOBKA26aad.....                                  | 21 |
| KONTOROLKA IYO BAARITAANKA .....                    | 21 |
| QODDOBKA27aad.....                                  | 21 |
| SARKAALKA LOOXILSAARAY (BAARE/KORJOOGA).....        | 21 |
| QODDOBKA28aad.....                                  | 21 |
| AWOODA BAARAH/KORJOOGA LOOXILSAARAY .....           | 21 |
| QEYBTA5AAD.....                                     | 22 |
| QODDOBKA29aad.....                                  | 22 |
| DEMBIYADA .....                                     | 22 |
| QODDOBKA30aad.....                                  | 23 |
| GANAAXYADA .....                                    | 23 |
| QODDOBKA31aad.....                                  | 24 |
| HANTI LAWAREEGID.....                               | 24 |
| QEYBTA6AAD.....                                     | 24 |
| QODDOBKA32aad.....                                  | 24 |
| XALKA MUSHKILADAHA.....                             | 24 |
| QAYBTA7AAD.....                                     | 24 |
| ARRIMAH REEBAN .....                                | 24 |
| QODDOBKA33aad.....                                  | 24 |
| HABABKA KALLUUMEYSIGA EE REEBAN .....               | 24 |
| QODOBKA33 (A).....                                  | 25 |
| BOOYADA MACLUUMAADKA.....                           | 25 |
| QODOBKA33 (B).....                                  | 25 |
| KU HEYNTA TUUNDADUSHA MARKABKA .....                | 25 |
| QODOBKA33(C) .....                                  | 25 |
| AALADA ARUURINTA IYO GABAADKA KALLUUNKA (FAD) ..... | 26 |
| QODDOBKA34aad.....                                  | 27 |
| KALLUUMEYSIGA NOOCAYADA KHATARTA KUSUGAN.....       | 27 |
| QODDOBKA35aad.....                                  | 27 |

|                                                         |    |
|---------------------------------------------------------|----|
| WASAKHAYNTA BIYAHA LAGA KALLUUMEYSTO .....              | 27 |
| QODDOBKA36aad.....                                      | 28 |
| WAXYEELEYTA IYO BURBURINTA QOLOF-QAREEDDA .....         | 28 |
| QODDOBKA37aad.....                                      | 28 |
| WAXYEELIDDA DHIRTAKA BAXDA XEEBAHA (SHOWRI MAANYO)..... | 28 |
| QODDOBKA38aad.....                                      | 28 |
| KA SHAQAALEYSIINTA BADMAAXIINTA SOOMAALIYEED .....      | 28 |
| MARAAKIIBTA KALLUUMEYSIGA SHISHEEY .....                | 28 |
| QODDOBKA39aad.....                                      | 29 |
| KASHAQAYNTA BIYAHA DALKA .....                          | 29 |
| QEYBTA8AAD.....                                         | 29 |
| QODDOBKA40aad.....                                      | 29 |
| HORUUMANITA KALLUUMEYSIGA.....                          | 29 |
| QODDOBKA41aad.....                                      | 29 |
| FULINTA SHARCIGAN.....                                  | 29 |
| QODDOBKA42aad.....                                      | 29 |
| XEERARKA .....                                          | 29 |
| QODDOBKA43aad.....                                      | 30 |
| BAAB'IN.....                                            | 30 |
| QODDOBKA44aad.....                                      | 30 |
| DHAQANGAL.....                                          | 30 |

**QEYBTA 1<sup>AAD</sup>**  
**QODDOBKA 1<sup>aad</sup>**  
**XIGASHO**

**Dukumintigan waxaa loo xigan karaa ‘Sharciga Kalluumaysiga dowlad gobolleedka Jubbaland ee soomaliyeed’**

**QODDOBKA 2<sup>aad</sup>**  
**ERAY- BIXIN**

**Ujeeddada xeerkan eray walba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:**

- 1. Wasaarad:** micnaheeda waa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo dhaqaalaha buluuga ah ee Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed.
- 2. Wasiir:** micnihiisu waa Wasiirka Wasaaradda kalluumeysiga iyo dhaqaalaha buluuga ah Ee Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed.
- 3. Noole Biyood:** waxaa loola jeedaa dhirta iyo xayawaanka kunool biyaha, (marka laga reebo shimbiraha), oo ay kamid yihiin kalluunka, qolofleyda, dhagax badeed iyo xamaaratada kunool biyaha dhexdooda, ukumaha qolofleyda ama naasaleyda kunool biyaha iyo nooleyaasha kale ee sida dabiiciga ah looga helo biyaha.
- 4. Kalluumaysi:** macnahiisu waa qaadashada, dabashada ama qabsashada kalluunka iyo noole biyoodyada kale nooc walba ee laqabto.
- 5. Shatiga Kallumaysiga:** macnihiisu waa ruqsada la siiyo cid kasta ee codsata in ay ka kalluumaysato, ka shaqeysato, ka ganacsato ama cilmi-baaris ku sameyso wax- soo-saarka kheyraadka badda Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed ee buuxisa shuruudaha kalluumaysiga.
- 6. Markab Kalluumeysi:** Waxaa loola jeedaa gaadiid badeed kasta ee loo qalabeeyay, si caadi ah loo isticmaalo kalluumeysiga iyo wixii laxariira
- 7. Gaadiid Badeed:** Waxaa loola jeedaa doon, marakab, hoofarkaraafti, ama wixii kale Ee biyaha ku socda oo ay ku jira ama maraakiibta kalluumeysiga.
- 8. Bixinta Shatiga:** waa ruqsad ay Wasaaradda Kalluumeysiga iyo dhaqaalaha buluuga dowlad gobolleedka Jubbaland ee soomaaliyeed ay siiso codsadaha soo qorta in la siiyo Shatiga Kalluumaysiga.
- 9. Baare:** macniheedu waa qofka loo xil saaro in uu noqdo xaqiijiye ama hubiye.
- 10. Korjooge:** waxaa loola jeedaa qabiir kalluumeysiga oo ay magacaawday wasaaradda si uu uga howlgala markab kalluumeysi ama howlaha kale ee la xiriira kalluumeysiga.
- 11. Mulkiile:** waxaa loola jeedaa wixii la xiriira ama khuseeya maraakiibta kalluumaysiga ee haysta shatiga iyo cidkasta oo mulkiile markab ama kireyste markab ah ama kireyste gaadiid badeed ah.

12. Ilaalinta Noolaha Badda: waxaa loola jeedaa naasoleyda badda, noole isku-isir ah ee khatarta kujira iyo noole biyood, kuwaas oo laga dhawrayo in la ugaarsado.

13. Nooca kalluunka la ugaar sanayo: Waxaa loola jeedaa nooca kaluunka la rabo in la kalluumeysto

14. Loogga Markabka: macnahiisu waa buugga loo yaqaan (Log) ee markabka looga baahanyahay waana in lagu xafido markabka gudihiiisa kaa soo haysta shatiga.

15. Loog buuga electrooniga: waxa loola jeedaa diiwaan lagu keediyo macluumaadka iyo xogta kallumeysiga taasoo loo adeegsanaayo ilaalinta iyo maareynta caalamiga, taasoo ay usoo gudbiyaan maraakiibta kallumeysiga hay'adaha ay quseyso iyada oo loo deegsanaayo aalada kombuyuutarka.

16. Diiwaanka Kalluumeysiga Qaranka: Waxaa loola jeedaa diiwaan markabka kalluumeysiga ee lagu qoro wax soo saarka oo ay bixiso dowlada calankeeda la sito ama looga baahdo dan kasta oo la xariirta kalluumeysiga iyo wixii laxariira, kaasi oo leh bogagaan lagagoyin karin, midkastana ay leedahay lambar ugaar oo ku daabacan si is dabajoog ah.

17. Calanka Qaranka: waxaa loola jeedaa calanka qaranka markabka laga aqoonsaday in uu ka diiwaan-gashan yahay taas oo waafaqsan sharciyada caalamiga ah.

18. Markab Kalluumaysi Qalaad: waxaa loola jeedaa markab kasta ee loo isticmaalo kalluumaysi ama looga shaqeysto dhaqaale ama cilmi-baaris kheyraad badeedee qalaad.

19. Markab kalluumeysi qaran: Waxa loola jeedaa markab kalluumeysi oo ay leedahay dowlada federaalka Somaaliya

20. Markab kalluumeysi gaar loo leeyahay: Waxa loola jeedee markab kalluumeysi oo sii gaarka ah u leeyihiin muwaadiniin Soomaaliyeed.

21. Qabasho: macnaheedu waa kheyraadka lagu qabtay qalabka Kalluumaysiga sida qalabka shabaqa lagu jiido, makaalinta iyo qalabka shabaga wareega.

22. Qabasho–dhacdo: macnaheedu waa noole kasta oo loo qabto si dhacdo ah iyo kuwa bartilmaameedka ahba.

23. Dhul Dejinta: waxaa loola jeedaa waxyaabaha la sooqabtay oo dhulka lagu soo dajiyo.

24. Qeybta keydka: waxaa loola jeedaa meesha qalabka kalluumaysiga lagu keydiyo gudaha markabka, lagana qaado meesha lagu isticmaalo caadi ahaan marka la kalluumaysanayo.

25. **Biyaha Beriga:** waa biyaha webiyada iyo biyaha qabatinada ay ku nool yihiin noole biyoodku.
26. **Diyaarad:** Waxa loola jeedaa aalad kasta oo hawada ku duuli karta oo ay ku jiraan kuwa qumaatiga u kaca, kuwa aan cidi wadin, kuwa meel fog laga hago oo hawada meereysato.
27. **Aalada Aruurinta iyo Gabaadka Kaluunka (FAD):** waxa loola jeeda aalad sabeyneysa, socota ama taaganoo ka sameysan gabaad dabiici ah ama la warshadeeyay oo ay kamid yihiin waxyaabaha sabeeya sida booyadaha, karaabta, shabaagta, caagadaha, biraha, geedaha baambooga, tiirarka oo lagu xiro walxaha Elaktaroonikada oo loogu talagalay inay ku sabeeyaan biyaha sare ama kuwa sare udhaw, taasi oo uu kusoo aruuro kalluunka iyo wixii dabiici ah u sabeeynaya oo la duldhigay aalad sheegeyso goobta uu yaala.
28. **Booyadaha ama macluumaadka:** waxaa loola jeedaa aalado sabeeya ama taagan, oo ay dhigaan dowlada ama hay'ado-cilmiyeed la aqoonsan yahay oo loola jeedo in si elektaroonik ah ay u soo aruuriyaan una cabiraan xogta hay'adda oo aan loogu talo gelin howlgalo kalluumeysi.
29. **Biyaha Kalluumeysiga Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed:** Waxa loola jeedaa dhamaan biya badeedka Jubbaland una madax banan tahay, awooda heeda iyo xaq madaxbanaanida sida ku cad qodobka 3aad ee Sharciga Kalluumeysiga dowlad Goboleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed.
30. **Qalabka Kalluumeysiga:** waxaa loola jeedaa agab kasta oo la xiriira qabashada kallunka ama loo isticmaali kara qabashadiisa sida shabaagta, xargaha, fiilo, karaabta, cilimo, jilbaha, aalada gabaadka iyo uruurinta kalluunka, wiishka, doonta, ama doon iyo diyaarad dul saaran markabka ama baabuur loogu tala galay in uu lashaqeeyo howlaha kalluumeysiga.
31. **Sharcigan/Xeerkan:** Waxaa kamid ah xeer hoosaadyada, amarada, iyo wixii kale oo qaab sharci fulin leh.
32. **Kabtan:** Marka laga hadlayo markab, diyaarad ama baabuur, waxaa loola jeedaa qofka masuulka ah ama ugu sareeya ama madax ka ah markabka, diyaaradda ama baabuurka oo uusan kujirin duuliye ah marakabka usaran hagd darteed.
33. **Howlaha la xariira kalluumeysiga:** Waxaa ka mid ah howlgal kasta oo lagu taageerayo, ama lagu diyaarinayo kalluumeysiga, sida soo dejinta, habeynta, baakadeynta, kala-wareejinta ama qaadista kalluun aan horey deked lagu dejin iyo weliba sahaysiinta sida shaqaale, shidaal, qalab iyo agab loogu geeyo badda

## **QEYBTA 2<sup>AAD</sup>**

### **QODOBKA 3<sup>AAD</sup>**

#### **DHERERKA BADDA SOOMAALIA**

- 1. Dhererka Xeebta bada Soomaaliyeed waa 3,333Km oo balaceeduna yahay 200 Mayl badeed (EEZ).3984 Km, marka lagu daro Jaziiradaha. Jubbaland dhererka xeebteed waa 405 Km.**
- 2. Aaga gaarka u ah oo loo xadidey Kalluumaysatada Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed ee degan xeebaha mamnuucana ka ah in cid kale ka kalluumaysato waa 12 Mayl Badeed.**
- 3. Aaga ilaalinta waa ilaa 12 Mayl Badeed waana aaga lagu ilaaliyo kalluumaysatada xeebaha oo aan loo ogolayn in Maraakiibta kalluumaysigu soo galaan oo ka kalluumaystaan. Waxaa gaari kara oo ka kalluumaysan karo kalluumaysatada xeebaha degan.**
- 4. Aaga loo ogol yahay in Maraakiibta shatiga la siiyo ay ka kalluumaystaan waa wixii ka shisheeya 12 Mayl Badeed ilaa dhererka badda Soomaaliyeed ee lagu xusidoono heshiyada qeybsiga kheyraadka ee la xariira kallumeysiga ee Dowladda Federalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah.**

### **QODDOBKA 4<sup>aad</sup>**

#### **MAS'UULIYADDA WASAARADDA**

- 1. Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay maareeynta iyo horumarinta Kheyraadka badda ee dawlad goboleedka Soomaaliyeed ee Jubaland iyo meel marinta ku dhaqanka xeerkan.**
- 2. Wasaaraddu waxay ururinaysaa macluumaadka kheyraadka badaha iyo xogta kale ee la xiriirta kallumeysiga, isuduwidada, maareynta iyo daabicidda xogta khuseysa dhaqdhaqaaqa kallumeysiga Jubaland iyo badbaadinta kheyraadka.**
- 3. Wasaaraddu waxaa kale oo ay mas'uul ka tahay in ay hirgeliso horumarinta dhaqdhaqaaqa kallumeysiga xeebaha JubbaLand, waxayna kordhin doontaa horumarinta dhaqdhaqaaqa kallumeysiga maxalliga ah iyo kan casriga ahba iyo dhammaan waxyaabaha kale ee la xiriira, oo ay kamid tahay maal gashiyada qalaad (foreign investments), kuwaas oo faa'iidooyin badan uleh mujtamaca kunool xeebaha.**

## **QODDOBKA 5<sup>aad</sup>**

### **MABAADII'DA MAAREYNATA IYO ILAALINTA KALLUUMAYSIGA**

**1. Wasaaraddu waxay hubinaysaa in noole-biyoodka iyo kheyraadka xeebaha dawlad Goboleedka Jubaland sida ugu habboon ee loo dhawro loona maamulo sida:**

**a). In lahubiyo in kheyraadka nool aan halis lagelin lana dhawroiyaga iyo deegaankoodaba iyadoo laga fa'iidsanayo.**

**b). In la hubiyo in kheyraadkaasi ay abuuraan wax-soo-saar habboon oo joogta ah, iyadoo la tixgelinayo bay'ada ku habboon dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada**

**c). In la hubiyo dhamaan libaax badeedka la qabtay iyo qeybihiisa oo dhan la isticmaalo, lagana faa'ideysto dhamaantiis.**

**d). In la hubiyo halbeega tirada ugu yar ee laga qaban karo tunada Ilbuurta, tuunada kale iyo tuna u ekaha iyadoo lala kaashanaayo daneystayaasha kale.**

**2. Wasaaraddu waxay xaqiijinaysaa in ka-qeyb-qaadashada kale ee kheyraadka nool ee ku jira biyaha Jubaland iyo Soomaliyaba si hab-sami ah loo kontoroolo ama loo maareeyo si loo hubiyo kafa'a'iideysiga wada jirka ah ee kheyraadka, gaar ahaan maraakiibta waddaniga ah iyo maraakiibta kalluumaysiga shisheeye labaduba in aysan ka saro marin guud ahan inta loo ogol yahay inay qabtaan ee kheyraadkaas waqtigaay Wasaaraddu u ogolaatay iyadoo la tixgelinayo cilmiga ugu habboon ee Wasaaraddu haysato iyo arrimaha kale ee khuseeya oo ay ka mid tahay dhibaataadada lagu ugeysto noolaha ay ku tiirsanyihiin.**

**3. Wasaaraddu waxay horumarinaysaa siyaasadda Kalluumaysiga Badda, webiyada, biyo qabatinada iyo qorshaha saldhigu noqonaya xeerkan.**

**4. Wasaaradu waxay go'aaminaysaa talaabooyinka lagu ilaalinayo laguna maareynayo noolebiyoodka, iyadoo tixgalinaysa talooyinka ay bixinayaan cidii khibrad uleh iyo latashi cidday khuseyso.**

**QODDOBKA 6<sup>aad</sup>**  
**HORUMARINTA KALLUUMAYSIGA**

1. Wasaaraddu waxay wada-shaqeyn iyo wadatashi lasameynaysaa hay'adaha dowliga ah, kuwa dowliga ahayn iyo waaxyaha kale ee dalka si ay u horumariso Kalluumaysiga xeebaha, warshadaha iyo waxyaabaha kale ee la xiriira warshadeyntooda iyadoo laqaadayo tallaabooyinka soo socda:

- a. Bixinta shaqo-fulinta adeegga tababarada;
- b. Qabashada cilmi-baarisyo;
- c. Kor-u-qaadista wada-shaqeynta udhexeysa Wasaaradda iyo Kalluumaysatada;
- d. Kor u qaadida suuqyada wax soo saarka kheyraadka badda;
- e. Bixinta qalabka kaabayaasha iyo
- f. Kor-u-qaadidda xirfadaha kalluumaysiga iyo abuuristoodaba.

**QODDOBKA 7<sup>aad</sup>**  
**MAAMULKA KALLUUMAYSIGA**

1. Wasaaraddu waxay diyaarinaysaa ama keydinaysaa qorshaha maamulka iyo horumarinta kalluumaysiga biyaha dawlad goboleedka Jubaland ee Soomaaliyeed iyadoo ku saleynaysa qorshaha barnaamijka horumarinta kalluumaysiga

2. Qorshe waliba waa in uu:

a). Caddeeyo Kheyraad-baarista ee kalluumaysiga iyo qiimeynta xaaladda waqtigan uu ku sugan yahay ka faa'ideysigiisu

b). In uu caddeeyo ujeeddooyinka la rabo in laga gaaro maareynta Kalluumaysiga iyo

c). In uu caddeeyo barnaamijka shati-bixinta ee Kalluumaysiga iyo qiimeynta xaaladda waqtigan uu ku suganyahay ka faa'ideysigiisu.

3. In la diyaariyo maareynta Kalluumaysi kasta iyo qorshaha horumarintiisa sida:

a). In la tixgeliyo lana hago mabaadii'da lagu xusay qodobka 4aad ee xeerkan;

b). In lala tashado dadka ku hawlan Kalluumaysiga maamulka Jubaland iyo cidkasta oo uu khuseeyo qorshaha dawladda jubaland iyo

c). In lasoo bandhigo qorshe qabyo ah ee khuseeya maareynta kalluumaysiga ee dhammaan gobollada dalka.

4. Wasaaraddu waxay la tashi ka sameynaysaa meel kasta oo suura gal ah sida xukuumada, maamulka kalluumaysiga ee gobolka guud ahaan, gaar ahan kuwa aan wadaagno sooh dimaha ama laxiriira noolayaasha iyadoo aragtida laga leeyahay ay tahay iswaafajin iyo sidii hor u kac loogu samayn laha ama maareynta kalluumaysiga ee dawlad goboleedka oo dhan.

5. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa war-side ama website kaasoo joogto ah loogu soo qoro qorsheyaasha iyo akhbaaraadka rasmiga ah oo kooban.

## **QODDOBKA 8<sup>aad</sup>**

### **MAAREYN TA KALLUUMAYSIGA**

- 1. Wasaaraddu waxay dejinaysaa xeerka lagu dhaqo maareynta ugu habboon ee kalluumaysiga.**
- 2. Talaabooyinka loo dejiyey maareynta kalluumaysiga waxaa ku jira oo aan ku koobnayn:**
  - a). Xilli xirid meelaha loo xadiday noocyada Kalluumaysiga ama xaddidid hababka markabka loogu kalluumaysto iyo**
  - b). Xadidid hababka iyo qalabka oo uu ku jiro isha cabbirkeeda, sifooyinka kale iyo noocyada lagu soo dejin karo iyo ku ganacsigooda.**
- 3. Nidaaminta iyo dejinta kalluunka iyo maamulusameynta meelaha lagu dejiyo.**
- 4. Kontoroolka, wax soo saarka, kalluumeysiga ama kasoo saarista xayawaanka noole biyood kasta iyo dhirta katimaada biyaha laga kalluumaysto ee Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed.**
- 5. Wasaaraddu waxay nidaaminaysaa islamarkaana dejinaysaa talaabooyin iyo maareyn mamnuuc yahay sashada iyo soo iibinta qalabkasta ee kalluun ama noole biyoodka leh hadii uusan lahayn ruqsad ay Wasaaraddu bixis**

## **QODDOBKA 9<sup>aad</sup>**

### **MACLUUMAADKA KALLUUMAYSIGA IYO FAAFINTOODA**

1. Wasaaraddu waxay ururinaysaa tiro koobka macluumaadka iyo maareynta akhbaaraha dadweynaha ee khuseeya dhaqdhaqaaqyada kalluumaysiga Jubaland
2. Wasaaraddu waxay samaynaysaa faaqidaad iyo soo saarid tiro koob iyo akhbaaro kale ee kalluumaysi.
3. Wasaaraddu waxay ka dalbanaysaa cidkasta oo ku hawlan kalluumaysiga iyo dhaq dhaqaaqyadda la xiriira in ay u soo gudbiyaan macluumaadka khuseeya shaqooyinkooda sida ugu haboon sarkaalka loo xil saaray.
4. Wasaraddu waxay la tashi iyo iskaashi lasamaynaysaa laamaha dawlad goboleedyada federaalka Soomaaliyeed ee ku hawlan Kalumaysiga.

## **QODDOBKA 10<sup>aad</sup>**

### **CILMI-BAARIS**

1. Markabka laguma isticmaali karo gudaha biyaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed iyadoo cilmi-baaris lagu sameynin taas oo la xiriirta Kheyraadka nool marka laga reebo ogolaanshaha Wasaaradda ama iyadoo la tixgelinayo shatiga kalluumaysiga uu haysto.
2. Wasaaraddu waxay u ogolaan kartaa ruqsad qoraal ah, cidkasta ama markab in uu kalluumaysto isagoo ujeeddadiisu tahay inu usameeyo cilmi-baaris cilmiyeysan isagoo dhawraya xaaladaha ay Wasaaraddu u dejisay, islamarkaana laga qayb geliyo Aqoon yahano Soomaaliyeed markii aysan ku caddeyn xeerkan.
3. Wasaaraddu waxay gacan-siinaysaa islamarkaana dhiiri-gelinaysaa awoodda cilmi-barista muwaadiniinta Soomaaliyeed si loo gaara wax-soo-saar sarreeya.

## **QODDOBKA 11<sup>aad</sup>**

### **XADDIDIDA KALLUUMAYSIGA**

Meelaha looga baahan yahay xaddidaada maareynta ku habboon ee cadadka dadka, maraakiibta, shabaagadaha ama xaaladaha kale ee looga shaqeeyo kalluumaysiga, Wasaaraddu waxay ogeysiin ku bixinaysaa wargeyska rasmiga ah ee Jubaland iyo waxyaabaha kale ee wararka lagu baahiyo meelaha xaddidaadaas laga doonayo sida:

- a). Fasax-bixin ama shatiyo cusub;
- b). Ku khasbid shati gaar ah ama cashuur bixin iyo
- c). Kala fadilid shati bixin ee kalluumaysiga kale.

### **OEYBTA 3<sup>AAD</sup>**

#### **QODDOBKA 12<sup>aad</sup>**

#### **DIIWAAN GELINTA MARAAKIIBTA KALLUUMAYSIGA**

- 1. Wasaaraddu waxay siinaysaa shati kalluumaysi maraakiibta ka kalluumeysata biyo badeedka Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed ayadoo la tixgelinaayo wada shaqaynta dawlad Federalka ah ee Somaliya.**
- 2. Wasaaraddu waxay siinaysaa codsadaayaasha shatiga kalluumaysiga ay ubaahan yihiin, iyagoo heli doona diiwaan gelin maraakiibtoda oo ansax ah.**
- 3. Markab ama Doon kama kalluumeysan karo biyaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed isagoo oo aan haysan shati kalluumeysi oo diiwaangashan.**
- 4. Shahaadada diiwaan-gelinta ee habsamida loo bixiyey waxaa loo isticmaali karaa bixinta lacagaha cashuuraha ku waajibtey milkiilaha ama markabka.**
- 5. Cid kasta oo isticmaasha markab si ay uga kalluumaysato biyaha dawlad goboleedka Jubaland ee Soomaaliyeed iyadoon haysan shati diiwaangashan waxaa la hor geynayaa maxkamad awood uleh.**
- 6. Arjiga shahaadada kalluumaysiga waa qoraal, waxaana si kooban loogu muujiyaa arrimaha soo socota:**
  - a).Magaca, iyo magic hore (hadii uu jiro)**  
**lambarka diiwaangashan,**  
**lambarka IMO (hadii uu jiro),**  
**dekadda uu ka diiwaangashan yahay calanka iyo calanki hore (hadii uu jiro).**
  - b). Magaca milkiilaha, kireystaha ama howl galiyaha haddii uu jiro kabtanka/naaquudaha markabka;**
  - c). Cadeyn in mulkiilaha markabka kalluumeysiga uu yahay/yihiin muwaadin d. Cinwaanka mulkiilaha ama kireystaha ama howl geliyaha**
  - e). Nooca, Dhereka iyo culeyska guud ee markabka Ballaca Markabka**
  - f). Goobta iyo taariikhda lagu dhisay**
  - g). Awooda Matoorka inta Kiilowaat/Farasuuyahay iyo nooca markabka**
  - h). Tirada badmaaxiinta iyo dhalashadooda**
  - i). Diiwaanka qorista wax soos aarka waa inuu saran yahay markabka**
  - j). In uu xafiis ku leeyahay gudaha dalka**
  - k). Calaamadaha caalamiga ee loogu yeero, qalabka hagidda iyo kaabayaasha saran markabka;**
  - l). Faahfaahinta hawlaha kalluumaysi ee uu soo dalbaday iyo saxiixa codsadaha;**
  - m).Nooca kalluumaysiga la rabo in laga kalluumaysto;**
  - n). Cadeyn qaabka loo kalluumaysto;**
  - o). Hababka kalluumaysiga iyo qalabka;**
  - p). Noocyada Kalluunka la aruursanayo**
  - q).Hababka wax-soo-saarka ee la adeegsanayo, faahfaahinta qorshaha suuqgeynta, meesha loogu tala galay iyo isticmaalka wixii la soo saaray;**

- r). Faahfaahin goobta laga kalluumaysanayo;
- s). Tirada kalluunka ama noole biyoodyada kale ee la qaban karo;
- t). Mudada shatiga uu ansax yahay
- u). Faafaahinta kaaliyaha kabtanka, magaca iyo aqoonta iyo wadamada ay u dhasheen
- v). Inay usoo gudbiyaan xog kasta ee Wasaaradu ka codsato

**QODDOBKA 13<sup>aad</sup>**  
**HESHIIS KALLUUMAYSI**

Wasaaraddu waxay samaynaysaa wadatashiyo haddii loo baahdo, waxayna heshiisyo la geli kartaa dawlad kale iyo hay'ado caalami ah oo dawladuh u-xil-saarteen awoodda ka wada- hadalka heshiisyada kalluumaysiga.

**QODDOBKA 14<sup>aad</sup>** **QEYBTA 4<sup>AAD</sup>**  
**BIXINTA SHATIYADA GUUD AHAAN**

1. Iyadoo aan la kala soocin waxaa shati kalluumaysi la siin karaa cid kasta oo buuxisa shuruudaha sharcigaan udegsan.
2. Kallumaystada Soomaaliyeed waxay yeelan doonaan mudnaan gaar ah ee ogolaanshaha kalluumaysiga iyo shati siintaba.

**QODDOBKA 15<sup>aad</sup>**  
**OGOLAANSHAHA KALLUUMEYSIGA IYO SOO GELIDDA BIYAHA DOWLAD GOBOLLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYEED**

1. Waa in uusan markab qalaad ka kalluumaysan, iskuna dayin in uu ka kalluumaysto ama uu kaqeybgalo shaqooyin kalluumaysi gudaha biyaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed isaga oon haysan shati ansax ah ee waafaqsan sharcigaan.
2. Markab kasta ee kalluumaysi ee soo gala biyaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed asaga oon haysan shati ansax ah, waa in la horgeeyaa Maxkamad awood uleh si loogu qaado sharciga u degsan kalluumaysiga Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed.
3. Markab kasta ee kalluumaysi oo soo gala biyaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed ayna ku caddaato in uu jebiyey qodobka 11aad ee sharcigaan, wuxuu noqonaaya eedeysane lagu fulinaayo sharcigaan.
4. Dhamaan maraakiibta qalaad ee kalluumaysi oo doonaya xuquuqda ka hawl-galka gudaha biyaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed waxay u baahan yihiin ruqsad gelitaan oo ay ka helaan Wasaarada.

**QODDOBKA 16<sup>aad</sup>**  
**BIXINTA SHATIGA MARAAKIIBTA QALAAD EE KALLUUMEYSIGA**

- 1. Dhammaan shatiyada kalluumeysi ee la bixiyey aana ka soo bixin xafiiska Wasaarada Kallumaysiga iyo Kheyraadka badda dawlad goboleedka Jubaland ee Soomaaliyeed waxaa loo aqoonsan yahay kuwo aan ansax ahayn markuu dhaqan gal noqdo sharcigan**
- 2. Codsadaha shatiga ee maraakiibta kalluumaysiga qalaad waa in uu arjigiisa oo qoraal ah uu keeno Wasaaradda sida ku qoran dukumintiga warbixinta lagu buuxiyo (foom).**
  - a). Wasaaraddu waxay bixin kartaa shatiga maraakiibta kalluumeysiga qalaad markii:**
  - b). Ay ogaato inay jiraan kheyraad kalluumaysi oo dheeri ka ah shaqooyinka kalluumaysiga u gaarka ah Soomaalida iyo**
  - c). Ay go'aansato in tirada dheeriga ah ee laga kalluumeysan karo iyo tusmooyinka cadadahaan**
- 3. Markabka kalluumaysiga qalaad waa in uu u hogaan sanyahay shuruudaha shati qaadashada ee sharcigan ku tilmaaman.**

**QODDOBKA 17<sup>aad</sup>**  
**BIXINTA SHATIGA KALLUUMEYSIGA EE MUWAADINKA**

- 1. Waxaa laga dhafay shatiga kalluumeysiga in la siiyo noocyada doonyaha soo socda:**
  - a). Kuwa matoor la'aanta ah;**
  - b). Kuwa Matoorka leh balse dhererkoodu dhaafsiisneyn afar mitir ama**
  - c). Kuwa Loo isticmaalo kalluumeysi madadaalo keliya.**
- 2. Codsade kasta oo wadani ah ee doonaya shati markab kalluumaysi waa in uu arji qoraal ah u soo gudbiyaa Wasaaradda waana inay ku jiraan akhbaaraha ku tilmaaman xeerkan (Foomka shatiyada).**
- 3. Muwaadin kasta ee u doonaya shatiga-markab kalluumeysi qalaad, waa in uu u hoggaansamaa shuruudaha loo dajiyey oo ay kamid yihiin hanaanka maareynta iyo lacag bixinta sida Diiwangelinta iyo lacagaha qidmada.**

## **QODDOBKA 18<sup>aad</sup>**

### **UJUUROOYINKA**

1. Ujuurooyinka uu bixinayo muwaadinka doonaya shati markab kalluumeysi, waxaa go'aan kagaaraya Wasiirka, wuxuuna ku soo saarayaa wareegto labaafinaayo, iyadoo loo qaybinayo dhammaan inta haysata shatiyada xiligan la joogo iyo qaybaha kale ee ay khusayso.
2. Markab wadani waa in uusan kalluumaysan haddii aan laga saamixin qodobka 11aad ee xeerkan.
3. Wasaaraddu waxay ka saamixi kartaa cidii mutaysata oo leh maraakiib kallumeysi oo wadani ah wax yaabaha uu ka doonayo xeerkani, taasoo ku xiran xaaladaha Wasaaraddu soo jideysay.
4. Sarkaalka shatiyada bixiya markuu qiimeeyo duruufaha jira ee ku saabsan maraakiibta kallumeysiga wadaniga wuxuu ka saamixi karaa wiixii ujuuroorin ah ee ku baaqday.

## **QODDOBKA 19<sup>aad</sup>**

### **MUDADA SHATIGA KALLUUMEYSIGA EE QALAAD**

Shati kalluumaysi ee lagu bixiyey sharcigan waa in uu ahaadaa ansax muddo aan ka badnayn hal sano.

## **QODDOBKA 20<sup>aad</sup>**

### **MAMNUUCIDA IS DHAAFSIGA SHATIIYADA**

Waa in shatiga kalluumaysi ee lagu bixiyey xeerkan aan loo gudbin ruux labaad si uu ugu kallumaysto.

## **QODDOBKA 21<sup>aad</sup>**

### **XAFIDAADA SHATIIYADA**

Shatiga kalluumaysiga waa in lagu xafido gudaha markabka Kalluumaysiga ee leh ruqsada, waana in laga heli karo marka uu weydiisto sarkaalka loo xilsaaray & ciidanka ilaalada xeebuhu.

## **QODDOBKA 22<sup>aad</sup>**

### **ISTICMAALKA SHATIGA**

Isticmaal kasta ee shatiga kalluumaysiga ee hoos yimaada sharcigaan, waa in uu waafaqsanyahay habka iyo hannaanka sharcigani uu dejiyey.

**QODOBKA23AAD**  
**AWOODDA BIXINTA SHATIYADA**

1. Awooda bixinta shatiyada kalluumaysiga dawlad goboleedka Jubaland ee soomaaliyeed waxaa leh oo kaliya wasaarad Kallumaysiga ee dawlada Goboleedka Jubaland iyadoo wargalinaysa waaxda shatiyada wasaarada kallumaysiga dawlada fedraalka Soomaaliyeed

2. Sida ku cad Qod.54aad ee dastuurka kumeel gaarka ee federaalka Dowlad Gobolledka Jubbaland ee Soomaaliyeed, inta laga soo saarayo sharci qexayo qaybsiga dhaqaalaha iyo dakhliga, waxaa ka wada xaajoonayo Dowlada Federaalka Soomaaliyeed iyo dawlad goboleedyada sidii ay u qaybsan lahaayeen dhaqaalaha kasoo baxaayo shatiga Kalluumaysiga.

**QODDOBKA 24<sup>aad</sup>**  
**WAAJIBAADKA KALLUUMAYSATADA**

1. Cid kasta ee la siiyey shati kalluumaysi waxaa waajib ku ah in:

- a). Ay u hogaansanaato sharciyada dalka iyo xeerarka Wasaaradda;
- b). Ay Soo gudbiso warbixin joogto ah ee shaqooyinka Kalluumaysiga ay ku hawlan tahay, cadadka iyo noocyada noole-baddeed ee lagu qabto si lama filaan ah.
- c). Soo gudbin iyo warbixin joogta ah ee la xiriirta kallunka la qabtay iyo qalabka loo adeegsaday;
- d). in la Haayo buuga diiwaanka ama diiwaanka elektroonikada ah ee loogu qoro macluumaadka iyo xogta kallumeysiga, waana in laga helaa dusha markabka.
- e). in Laga dhowrsado jilaabashada noola-badeedka sharcigana in laalinayo oo ay kamid yihiin balse aan ku ekeyn naasaley-badeeda qubada badda, libaax-badeedyada kala ah libaax-libiri, baalcad, dooli iyo ilbuur, balse haddii si lama-filaan ah loo soo qabto waa in si dhaqso ah loo siidaayo, dibna biyaha loogu celiyo, loogana warbixiyo Wasaarada.

**QODDOBKA 25<sup>aad</sup>**  
**NOOLAYAASHA BADDA EE LABADBAADINAYO**  
**(NOOLAYAASHA KHATARTA KUSUGAN)**

- 1. Waa in aysan cidna ka kalluumaysan nooleyaasha khatarta ku sugan ee gudaha biyaha Jubbaland oo ay kamid yihiin balse aan ku ekeyn nasaley-badeeda, Qubada badda, labaax-badeedyada kala ah: libaax-libiri, baalcad, dooli iyo Ilbuur.
- 2. Nooleyaasha khatarta kusugan ee lagu qabto si lama-filaan ah waa in la sii daayo isla markaana lagu celiyo biyaha badda.
- 3. Cidna maqaadan karto ama ma burburin karto dhagaxa-badeedka (coralreefs), geed-badeedka (Showri maanyo/Mangroove trees) iyo qolof baddeedyada, marka laga reebo qoraal ogolaasho ee Wasaaradda.

**QODDOBKA26aad**  
**KONTOROOLKA IYO BAARITAANKA**

1. Cid kasta oo ku hawlan shaqooyinka kalluumaysiga waa inay u hogaansantaa in la baaro ama la kormeero markasta oo loo baahdo, Baaritaanka iyo kormeerka waxaa fulinaya cidii ay u xilsaarto Wasaaradda
2. Cid kasta ee ku xad-gudubta hanaanka u degsan xeerarkan waa in loo ka xeeyo dekada ugu dhaw ee dalka.
3. Markab ama cidkasta oo dembi ku gasha gudaha biyaha dawlad goboleedka Jubaland ee Soomaaliyeed, shati iyo shati la'aan una gudubta xadka dalka kale, waa la xukumayaa iyada oo maqan iyadoo la tixgelinayo sharciyada caalamiga ah.

**QODDOBKA27aad**  
**SARKAALKA LOO XIL SAARAY(BAARE/KORJOOG)**

Wasaaraddu waxay u xilsaari doontaa muwaadin ka tirsan wasaarada inu noqdo sarkaal u xilsaaran fulinta xeerkaan.

**QODDOBKA 28<sup>aad</sup>**  
**AWOODA BAARAH/KORJOOG LOO XILSAARAY**

1. Baare/korjooge kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu kontaroolo ama baaro meelkasta ee lagu tuhmayo in lagu haayo kalluun ama kheyraad kale oo lagu keenay si aan waafaqsaneyn sharcigan.
2. Baaruhu/korjooguhu wuxuu xaq u leeyahay in u kontaroolo ama baaro meelaha kalluunka lagu abuurayo, diyaarinayo, hagaajinayo, dejinayo ama lagu keydinayo.
3. Baaruhu/korjooguhu wuxuu xaq u leeyahay in uu qaado muunad kheyraadka uu ku hawlan yahay.
4. Kalluun kasta oo aan ku habboonayn in dadku cuno ama jirran ama si kale cudur faafa uleh, si toos ah ayaa loola wareegayaa.
5. Baaruhu/korjooguhu wuxuu awood u leeyahay in uu joojiyo islamarkaana dul-fuulo markab kalluumeysi ee kujira biyaha dawlad goboleedka Jubaland ee Soomaaliyeed, si uu u hubiyo, kalluunka saran, qalabka kalluumeysiga iyo agabyada kale ee la xiriira.
6. Wasaaraaddu waxay magacaabeysaa kormeerayaal u xilsaraan aruurinta macluumaadka kalluunka laqabtay ee laxaqiijiyay iyo xog cilmiyeysan oo laxiriirta kalluumeysiga tuunaha iyo tuna u ekaha.
7. Cid kasta ee ku xad-gudubta sharcigan waa in la hor-keeno Maxkamad awood u leh, sida ugu dhaqsiiyaha badan.
8. Sarkaalkasta oo loo xil saaro baaris waa in uu wataa aqoonsi buuxa, isla markaana uuso saaraa markii la weydsto ama loo baahdo aqoonsigiisa.

**OEYBTA 5<sup>AAD</sup>**  
**QODDOBKA 29<sup>aad</sup>**  
**DEMBIYADA**

Shaqaalaha iyo naaquudaha markab kasta oo ku xad-gudbo waxyaabaha la mamnuucay iyo qodobada kale oo hoos ku qoran waa denbiile waxaana laga qaadayaa talaabooyinkka soo socda:

1. Shaqaalaha ama naaquudaha markab kasta oo dembi kugeysta gudaha biyaha Dawlad goboleedka Jubaland, waxaa la horgeynayaa maxkamad awood uleh iyad oo loo cuskanaayo qodobada 30 & 31 ee sharcigan.
2. Qofkasta oo dembi ku gala gudaha biyaha Jubaland (ajnebi ama waddani) waxaa lahor- geynayaa maxkamad si loogu qaado fal-dembiyeedka uu galay.
3. Qof kasta oo isticmaalaya walxaha qarxa, qalab kalluumeysi aan sharci ahayn, burburinta dhagax badeedka ama dhir badeed, bacool badeed, sunta wax-suuxisa ama awood tirta kalluunka iyo noole-biyoodyada kale waxaa lahorgeynayaa maxkamadawood u leh iyadoo loo cuskanaayo qodobada 30 & 31 ee sharcigan.
4. Kalluumayste kasta oo kahor yimaada awaamirta Wasaaradda ee ku xusan sharcigan, waxa la horgeynayaa maxkamad awood u leh iyadoo loo cuskanaayo qodobada 30& 31 ee sharcigan.
5. Kalluumeysatada ugaarsata ama dhibaateeya naasleey-badeedda ama nooleyaasha kale ee khatarta ku sugan, waxaa la horgeynayaa maxkamad awoodda u leh iyadoo loo cuskanaayo qodobada 30 & 31 ee sharcigan.
6. Qofkii burburiya ama dhoofiya dhagax-badeedka (Coral reefs), geed-badeedka (Showri maanyo/Mangroovetrees) iyo qolof baddeedyada, oo aan ruqsad qoraal ah ka haysan Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad awoodda u leh iyadoo loo cuskanaayo qodobada 30 & 31 ee sharcigan.
7. Markab kasta oo aan haysan shatiga kalluumeysi isla markaana aan ka diiwaan- gashaneyn Wasaaradda kalluumeysiga iyo Kheyraadka badda jubbaland ee ka kalluumeysta biyaha Jubbaland, waxaa la horgeynayaa maxkamad awoodda u leh iyadoo loo cuskanaayo qodobada 30 & 31 ee sharcigan.
8. Ciddii diida macaluumaadka iyo xogta kalluumeysi ee looga baahan yahay ama marin-habaabisa saraakiisha Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad awood u leh iyadoo loo cuskanaayo qodobada 30 & 31 ee sharcigan.
9. Markabkii ama diyaaradii haraaga warshadaha ama nukliyarka (industrialor nuclear wastedumps) ku shubo biyaha badda Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed waxaa la horgeynayaa maxkamad awood u leh iyadoo loo cuskanaayo qodobada 30 & 31 ee sharcigan.

**QODDOBKA30aad**  
**GANAAXYADA**

1. Qofka lagu helo in uu galay fal-dembiyeed la xiriira qoddobka 29<sup>aad</sup> (1) waxaa lagu ganaaxi laga bilaabo US\$50,000–\$500,000 (konton kun ilaashan boqolookun oo dollar).
2. Sida ku cad qodobka12aad (3iyo5), ciddii ay ku caddaato in uu galay fal- dembiyeedkaas, wuxuu mutaysan doonaa ganaax u dhaxeeya: US\$50,000-\$100,000 (konton kun ilaa boqol kunoo dollar).
3. Qofkii lagu qabto isagoo isticmaalaya maadooyinka qarxa, qalabka ka-reeban kaluumaysiga, ku kaluumaysanaya xiliga bad-xireenka, burburiya jamal-badeedka ama dhir-badeedka xeebta ama qolof-badeedka waxaa lagu ganaaxayaa US\$500,000-\$5,000,000 (Shan boqol oo kun ilaa shan malyan oo doollar).
4. Qofkii gala dembiga ku cad qodobka 29aad (2ilaa8) waxaa lagu xukumayaa ganaax u dhexeeya US\$100.000–\$500.000 (boqol Kun ilaa shan boqol oo kun oo dollar).
5. Qofkii ama shirkadii gasha dembiga ku cad qodobka29aad (9) waxaa lagu xukumayaa ganaax u dhaxeeya US\$100,000,000-\$500,000,000 (Boqol Malyan ilaa shan boqol oo malyan ooDollar) iyo qarashka sifaynta deegaanka wax yeelada gaareen.
6. Ganaaxyada doomaha yaryar (sida huuriyada) oo ku xadguduba Kalluumaysiga waxaa lagu ganaaxi doonaa sida soo socdo:
  - a. Ganaax US\$ 200– \$400 (labo ilaa afar boqoloo doollar) ee doomaha yaryar oo matoor La’aanta ah.
  - b. Ganaax US\$ 700– \$1,000 (todobo boqol ilaa kun doollar) ee doon yar(huuri) matoor leh gaaraya 6– 30 Horsepower(HP).
  - c. Ganaax US\$1,100– \$1,500 (kun iyo boqol ilaa kun iyo shan boqol oo doollar) doon yar(huuri) matoor leh gaaraya 31– 60 Horsepower(HP).
  - d. Markab weyn oo uusaaran yahay Matoor Horsepowerkiisu yahay 61 HPama ka badan waa lala wareegayaa.
  - e. Qofkii isagudiida in uu keeno warbixinta la doonayo ama fulin waaya sharcigan waxaa lagu ganaaxayaa US\$ 1,000– 5,000 (kun ilaa shan kun doollar).

f. Qofkii gudan waaya waajibaadka ka saran shuruudaha sharcigan iyo xaaladaha heshiiska la kala galay, waxaa laga tirtirayaa ama lagala noqonayaa

g. Dhamaan lacagaha ka soo xarooda ganaaxyada kor kuxusan waxa la waafajinayaa habraaca wasaaradda Maaliyada ee Jubaland.

**QODDOBKA 31<sup>aad</sup>**  
**HANTI LAWAREEGID**

1. Cidkasta ee gasha dembi culus sida ku xusan Qodobka 29 farqadiisa 3<sup>aad</sup> iyo 9<sup>aad</sup>, markabka iyo qalabka uu dembiga ku galay waa lagala wareegayaa markii maxkamad awood u leh ay xukunto.
2. Sidoo kale, waxaa laga wareegayaa Kalluunka iyo noole-biyoodyada oo dhan ee laga helo dusha markabka.
3. Dembiyada ku xusan qodobkan waxaa qaadaya maxkamadoo awood u leh.

**QEYBTA 6<sup>AAD</sup>**  
**QODDOBKA 32<sup>aad</sup>**  
**XALKA MUSHKILADAHA**

Haddii uusan dembigu ahayn mid keeni kara ganaax adag Wasaaradda ayaa wada-hadal xal ah ku dhamaynaysa.

**OAYBTA 7<sup>AAD</sup>**  
**ARRIMAHA REEBAN**  
**QODDOBKA 33<sup>aad</sup>**  
**HABABKA KALLUUMEYSIGA EE REEBAN**

1. Maraakiibta ku howlan jiididda Jariifta waa ka mamnuuc ka kalluumeysiga biyaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed.
2. Shabaagaha lagu soo wareejiyo aag (Purse Seine), oo cabbirka ishooduna ka yar yahay 50-mm marka lakala jiidu waa mamnuuc.
3. Waxaa reeban isticmaalka shabaagta waa weyn ee sabeeyso (large-scale driftnets) oo kadheer 2.5 kiloo mitar oo loogu talagalay waafi qabad, dabin ama milqid kalluunka biyaha sare ama dhexe.
4. Adeegsiga ku kalluumeysiga qaraxa, sunta, korontada iwm waa reeban yihiin.
5. Wasiirka ayaa xeerar faah-faahsan ku soo saaraya hababka & qalabka kale ee kalluumeysiga oo reeban.

**QODOBKA33 (A)**  
**BOOYADA MACLUUMAADKA**

1. Markaba kasta ee kalluumeysi oo ka howlgala biyaha Dowlad Gobolledka Jubbaland ee Soomaaliyeed waa in aan u si u lakac ah:

- a). Uga kalluumeysan masaafo ka yar hal mayl baddad booyadda macluumaadka.
  - b). Kuxirto, gooyo, cuskada, kuwareejiyo ama kuqaata dusha markabka booyadda macluumaadka ee sabeyneysa ama xiran
2. Hadii ay si lama filaan ah qalabka kalluumeysigu ugu marmo booyadda macluumaadka uga bixi si bedqab ah

**QODOBKA33 (B)**  
**KU HEYNTA TUUNADA DUSHA MARKABKA**

Maraakiibta kalluumeysiga muwaadinka iyo ajnabiga ee ku qalabeysan shabaqa wareegasan (purse seine) oo ka howl gala biyaha Dowlad Gobolledka Jubbaland ee Soomaaliyeed waa in:-

1. Dusha markabka lagu hayo noocyada tuunada laqabtay, marka laga reebo kuwa aan u qalmin in bini'aadamku cuno;
2. Naaquudaha ama Kabtanka markabka kalluumeysiga inu xaqiijiyo in tuunada la qabtay loo siidaayo si deg deg ah, marka aaladda ciladowdo oo ay soo saari weydo shabaqa; iyo
3. Naaquudaha ama Kabtanka markabka kalluumeysigas si deg deg ah Wasaaradda uga warbixiyo wixii dhacay.

**QODOBKA 33 (C)**  
**AALADA ARUURINTA IYO GABAADKA KALLUUNKA (FAD)**

Wasaaradu waxay soo saareysaa:

1. Xeerar lagu maamulayo Aaladda Arruunita & Gabaadka Kalluunka (FAD)
2. Go'aano khuseeyo goobaha la dhigayo Aalada Aruurinta iyo Gabaadka Kalluunka, lagana fogaanayo marin-biyoodka maraakiibta iyo agagaarka dekedaha
3. Tilmaamo la xariira noocyada kala duwan iyo qaab dhismeedka ee FAD si loo yareeyo in kalluun aan loogu talo gelin ku miliqo ama ceegsamo
4. Tilmaamo faraya in naaquudaha markabka kalluumeysiga uu buuga ku qoro dhamaan xogta iyo macluumaadka howlaha kalluumeysiga ee agagaarka FAD

**QODDOBKA 34<sup>aad</sup>**  
**KALLUUMEYSIGA NOOCAYADA KHATARTA KU SUGAN**

1. Waxaa reeban ugaarsiga, dilka, ama wax yeeleynta naasleyda badda, qubada, libaax- badeedyada kala ah: libaax-libiri, baal cad, dooli iyo, Ilbuur, Maafoos iyo Saraacimo.
2. Waxaa reeban dabashada iyo ka ganacsiga naasleyda badda & Qubada xaalad nololeed ama dhimasho;
3. Kalluumeysatada iyo bulshada xeebleyda ah, waxaa ku waajib ah in ay dib u celiyaan Naasleyda badda iyo Qubada ku xanibma ama ku soo caariya xeebta.
4. Waxaa reeban ka ganacsiga ugxaanta & qolofa qubada iyo Saliideedaba.
5. Waxaa reeban in la dego ama hawl gal laga fuliyo goobaha ay ku tarmaan naasleyda badda iyo qubada;
6. Haddii si kama'ah ay naasleyda badda iyo qubadu ugu dhacaan shabaagta ama dabin oo kale, waa in sida ugu dhaqsiiyaha badan loo siidaayaa, dibna loogu celiyaa biyaha;
7. Wasiirka ayaa xeer ku soo saaraya naasleyda, qubada, libaax-badeedyada kala ah: libaax-libiri, baalcad, dooli, libiri iyo noolebiyoodka kale ee kharata ku jira ee ilaalin ubaahan.

**QODDOBKA 35<sup>aad</sup>**  
**WASAKHAYNTA BIYAHA LAGA KALLUUMEYSTO**

1. Qofna si barer ah ama kama'ah uguma shubi karo ama dhigi karo wax yaabaha wasakheyn kara biyaha laga kalluumeysto ee Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed, taas oo:
  - a. Wax yeeleyn karta kheyraadka ku nool biyaha, shimbiraha, deegaanka iyo dadka.
  - b. Carqaladayn karta howlaha kalluumeysiga. c. Khatar gelin karta socdaalka badda.
2. Markaay dhacdo in waxyaabaha wax wasakheeya ladhigo, lagu daadiyo ama lagu shubo badda si badheedh ah ama kama'ah, waa in Naakhuuduhu ama Mas'uulku Gaadiidka si degdeg ah warbixin u soo gaarsiiyaa Wasaaradda kallumeysiga iyo Kheyraadka badda jubbaland iyo warbixin taa soo xambaarsan macluumaadka:
  - a. Magaca war soo tebiyaha;
  - b. Magaca, baaqa iyo calaamadda gaadiidka;
  - c. Wasakhda iyo nooceda;
  - d. Saacada iyo taariikhda Iyo
  - e. Goobta

**QODDOBKA 36<sup>aad</sup>**  
**WAX YEELEYTA IYO BURBURINTA QOLOF-QAREEDDA**

1. Waxaa reeban xirfad kasta oo kalluumeysi oo keeni karta wax yeeleynta ama burburinta qolof-qareedka
2. Qofna ma gurankaro, kamana ganacsan karo Qolof-qareedka hoyga iyo daaqsinka noolaha badda.
3. Waxaa la mamnuucay adeegsiga biraha gabaadka lagaga soo saaro Aargoostada iyo noolaha kale, kuwaas oo waxyeela qarka iyo qolof-qareedka.
4. Qoddobkan ma khuseeyo hawlgalada lagu horumarinaayo abuurista iyo dib u abuurista qolof-qareedka, kuwaas oo laga fulinayo goobo ay Wasaaradu calaamadaysay.

**QODDOBKA 37<sup>aad</sup>**  
**WAX YEELIDDA DHIRTA KA BAXDA XEEBAHA (SHOWRI MAANYO)**

1. Qofna ma jari karo, kamana ganacsan karo showri maanyaha iyo dhirta kale ee xeebaha.
2. Qofna ma degi karo goobaha dhir xeebeedu ka baxdo si hoy, ganacsi, baaris ama hawlo kale ah haddii aan ruqsad laga helin Wasaarada.
3. Wasiirka ayaa wa reegto kasoo saaraya goobaha loo aqoonsaday deegaan dhireedka.
4. Waxaa la mamnuucay wasakhaynta deegaan xeebeedka oo ay ku jiraan goobaha dhirta, biyo mareennada, goobaha bacriminta iyo tarmida iyo goobaha uu ka soo dago Kaluunku.

**QODDOBKA 38<sup>aad</sup>**  
**KA SHAQAALEYSIINTA BADMAAXIINTA SOOMAALIYEED MARAAKIIBTA KALLUUMEYSIGA SHISHEEY**

1. Markab kasta oo kalluumeysi ajnabi ah, u haystana ruqsad ogolaasho kalluumeysi biyaha Jubaland, waa in laga shaqaaleysiiyo tiro badmaaxiin wadani ah.
2. Iyadoo la ee gayo baaxada markabka kalluumeysiga, Wasiirka ayaa go'aaminaya tirada badmaaxiinta ee ka hawl gelikarta markabkaasi.
3. Kalluumeystaha wadaniga wuxuu la xuquuq noqonayaa kalluumeysatada ajnabiga ah.
4. Kalluumeystuhu wuxuu hoyga, cunnada iyo daryeelka caafimaadka ku leeyahay Markabka;
5. Kalluumeystaha wadaniga ah waxaa dib loogu soo celinayaa isla goobtii laga qaaday.

**QODDOBKA 39<sup>aad</sup>**  
**KA SHAQAYNTA BIYAHA DALKA**

1. Qofna ama shirkadna ma shaqaalaysan karto kalluumeysato ajnabi ah haddii kalluumeysatada wadaniga ah shaqadaas ay qaban karaan.
2. Shaqaale kalluumeysi ajnabi ah kama hawlgeli karaan biyaha Jubaland haddii aanay ogolaansho ka haysan Wasaarada
3. Shirkadaha kalluumaysigu waa inay idaacdaha iyo wargeysyada ka baafiyaan shaqaalaha ay ubaahanyihiin.
4. Haddii dalka gudihisa laga waayo shaqalaha ay u baahanyihiin, shirkada kalluu meysigu waxay ka soo qoran karaan dibadda marka ay ogolaasho ay ka helaan hay'adaha ay khuseyso.
5. Shaqaale kasta ee kalluumeysi ajnabi ah waxaa loo dalbayaa ogolaansho-shaqo ay Bixiyaan hay'adaha ku shaqada leh.
6. Shaqaale kalluumeysi ajnabi kasta waa in uu maraa nidaamka dalka u degsansida dal-kugalka, baaris caafimaad iyo dokumenti cadeynaya dambi la'aanta

**QEYBTA 8<sup>AAD</sup>**  
**QODDOBKA 40<sup>aad</sup>**  
**HORUUMANITA KALLUUMEYSIGA**

Wasiirku wuxuu wareegto kusoo saarayaa siyaadada iyo qorshaha lagu maareynayo laguna hormarinayo qeybaha kale duwan ee kalluumeysiga deegaanada dawlad gobolleedka Jubaland.

**QODDOBKA 41<sup>aad</sup>**  
**FULINTA SHARCIGAN**

Sharcigan waxaa fulintiisa u xilsaaray Wasaaradda iyadoo kaashaneysa hay'adaha kala duwan ee Dowlad Gobolleedka Jubaland ee soomaliyeed oo ay khuseyso howshan.

**QODDOBKA 42<sup>aad</sup>**  
**XEERARKA**

Sharcigan wuxuu yeelanayaa xeerar lagu soo saari doono wareegto heer Wasiir, kuwaas oo si gaar ah ufaahfaahinaya hawlo kalluumeysi ee kale duwan sida qalabka, xiliyada kalluumeysiga, ilaalinta noola biyoodka khatarta ugu jira dabar go'a, wasakheyta deegaanka iyo guud ahaan qorshaha horumarinta iyo kafa'ideysiga khayraadka biyaha Dowlad Gobolleedka Jubaland ee Soomaaliyeed.

1. Xeerka Diiwaangelinta iyo kormeeke maraakiibta Kalluumeysiga
2. Xeeke hoosaadka xamaaratada
3. Xeeke hoosaadka qolofleyda
4. Xeeke hoosaadka naasleyda
5. Xeeke hoosaadka Ilaalinta deegaanka iyo noolaha dabar go'aya.
6. Xeeke goobaha badda ee ladhawrayo iyo xiliyada kalluumeysiga
7. Xeerka qajaarbadeed (Gus-badeed)
8. Xeerka suuqyada kalluunka, nadaafadooda iyo fayodhowrka guud.
9. Xeerka dhawrista Showir-maanyo, Shimbiraha iyo Qolof-Qareedka badda.
10. Xeerka noocyada kalluunka ee laga ganacsan karo.
11. Xeerka warshadaynta iyo suuqgeynta kalluunka.
12. Xeerka dhaqan gelinta, ka qayb gelida, wada shaqaynta iyo ka faa'iidaydiga dhaqaalaha loo qoondeeyey heshiisyada caalamiga ah ee ilaalinta iyo dhawrista badaha.

**QODDOBKA 43<sup>aad</sup>**  
**BAAB'IN**

**Waxaa labaabi'iyey Sharci kasta oo kahor imaanaya ama aan lasocon Karin sharcigan kalluumaysiga ee Dowlad goboleedka Jubaland ee Soomaaliyeed.**

**QODDOBKA 44<sup>aad</sup>**  
**DHAQANGAL**

**Xeerkan Kalluumaysigu wuxuu dhaqan-gal noqonayaa marka uu ansixiyo Golaha (Baarlamaanka Jubbaland Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed), uuna saxiixo, dikreetana ku soo saaro Madaxweynaha Dowlad Gobolleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed, kuna soo baxo Faafinta Rasmiga ah.**